Waa Nuqul Dawli ah – lama iibin karo


| JAMHUURIYADDA | | SOMALILAND |
|---|---|---|

# FAAFINTA RASMIGA AH

| SOMALILAND REPUBLIC OFFICIAL GAZETTE | ألنَّشرة الرَّسمية لجمهورية صوماليلاند |
|---|---|

XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA JSL, HARGEYSA

E-mail: Garyaqaankaguud@gmail.com

| Sanadka: 3aad | Cadadka: 2aad ee February | Taariikh: 01/03/2014 |
|---|---|---|

**QIIMAHA CADADKA: SL. Sh.**

**RUKUNKA (Subscription):**

*QIIMAHA FAAFINTA AAN DAWLIGA AHAYN ee Qaybta Shanaad: Sadarkii Boggii kastaaba SL. Sh.*


**TUSMADA CADADKA**


| | |
|---|---|
| ***QAYBTA KOWAAD***: **XEERARKA BAARLAMAANKA IYO XEER NIDAAMIYAYAASHA:** | |
| 1) **SOOMA BIXIN** | **45** |
| ***QAYBTA LABAAD***: **XEER NIDAAMIYAYAASHA IYO DIKREETOOYINKA MADAXWEYNAHA:** | |
| 2) **CAFIS MADAXWEYNE, XEER MADAXWEYNE Lr:** | **46** |

**0377/022014**

*QAYBTA SADEXAAD*: **DIGREETOOYINKA, WAREEGTOOYINKA, AMARADA & XEER NIDAAMIYAYAASHA WASIIRADA, IWM** 49

51

52

3) **Mamnuucid soo dejinta basaska albaabka bidix ku leh ,**
**AMAR WASIIR-KU XIGEEN,**
**Wasaarada Hawlaha Guud Guriyeynta iyo Gaadiidka J.S.L** 54

55

**QAYBTA AFRAAD: AMARADA & GO'AANADA MAAMUL** 57

4) **Diiwaan Gelin Shirikada Awdal Inmaa Group Company,**
**Xafiiska Xeer Illaalinta Guud** 59

5) **Diiwaan Gelin Shirikada Kamil Construction Company,**
**Xafiiska Xeer Illaalinta Guud**

6) **Diiwaan Gelin Shirikada Dhis-Kaal General Trading Company,** 61
**Xafiiska Xeer Illaalinta Guud** 62

7) **Diiwaan Gelin Shirikada Strategic Trading & Logistics Consultants Somaliland LTD** 64
**Xafiiska Xeer Illaalinta Guud** 65

8) **Diiwaan Gelin Shirikada O-Mart Mineral Company,**
**Xafiiska Xeer Illaalinta Guud**

9) **Diiwaan Gelin Shirikada Heego Construction and Transportation Company,**

**Xafiiska Xeer Illaalinta Guud**

10) **Magac Bedel Shirkadeed**
**Golis Solar oo loo bedelay Golis Energy Company Company.**
**Xafiiska Xeer Illaalinta Guud**

11) AMAR XAYIRAAD DHUL; Maxkamadda Sare J.S.L, MS/48/013.
12) AMAR XAYIRAAD DHUL; Maxkamadda Sare, MS/1/02/2014.
13) AMAR XAYIRAAD DHUL; Maxkamadda Sare, MS/1/03/2014.
14) AMAR XAYIRAAD DHUL; Maxkamadda Sare, MS/DC/1/2014.

## *QAYBTA SHANAAD*: OGEYSIISYADA

***Sooma bixin***

# QAYBTA LABAAD:

## XEER NIDAAMIYAYAASHA IYO DIKREETOOYINKA MADAXWEYNAHA:

**REPUBLIC OF SOMALILAND**

THE PRESIDENT

JSL/M/XERM/249-2284/022014 23/02/14

## XEER MADAXWEYNE Lr:0377/022014

## Cafis Madaxweyne

**Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland**

Markuu Arkay: Qodobka 90aad, Xubintiisa 5aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;

Markuu Arkay: Qoraalka codsiga ah ee uu soo qoray Diiriye Jaamac Geele;

Markuu La Tashaday: Masuuliyiinta ay arrintani khusayso.

Markuu Arkay: Qodobka 149aad ee Xeerka Ciqaabta Guud;

<u>Wuxuu Go'aansaday</u>

In laga bilaabo taariikhda maanta uu cafis gaar ahaaneed u fidiyo Diiriye Jaamac Geele, oo qaranimada Somaliland ka soo hor jeeday in muddo ah.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo
<u>Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland</u>

# <u>QAYBTA SADEXAAD:</u>

# DIGREETOOYINKA, WAREEGTOOYINKA, AMARADA IYO XEER NIDAAMIYAYAASHA WASIIRADA, IWM

**REPUBLIC OF SOMALILAND**

**JAMHUURIYADDA SOMALILAND**

**MINISTRY OF Public Works,**

**Wasaaradda Hawlaha Guud,**

**Housing & Transport**

**Guriyeynat & Gaadiidka**

**The Vice Minister**

---

**Ref: WHSIWKX/55/2014**

**Dare: 03/02/2014**

Ku: Wasaarada Madaxtooyada

Ku: Wasaarada Ganacsiga iyo Maalgashiga Caalamiga ah

Ku: Wasaarada Arimaha Guddaha

Ku: Wasaarada Maaliyada

Ku: Wasaarada Qorshaynta iyo iskaashiga Caalamiga

Ku: Wasaarada Warfaafinta iyo Wacyigelinta

Ku: Duqa Caasimada Hargeysa

Ku: Taliyaha Ciidanka Booliska

Ku: Xisaabiyaha Guud ee Qaranka

Ku: Hantidhawraha Guud ee Qaranka

Ku: Shirkadaha soo dejinta Iibinta/kiraynta baabuurta

Ku: Guddiyada Basaska Waaweyn/yar-yar

Ku: Hay'ada Horuumariinta Waddooyinka

Og: Taliye Qaybeedyada Ciidanka Nabadgelyada Waddoyinka

Og: Garyaqaanka Guud ee Qaranka

Og: Agaasimaha Guud ee W Hawlaha Guud guriyeynta & Gaadiidka

Og: Wasiirka  WHawlaha Guud Guriyeynta  iyo Gaadiidka

OG: Madaxweynaha Jamhuuriyada Somaliland

**<u>Ujeedo:- Mamnuucid soo dejinta basaska albaabka bidix ku leh</u>**

Mudanayaal;

Wasaarada Hawlaha Guud Guriyeynta iyo Gaadiidka waxay ka mid tahay halbwayaasha adeegayada Qaranka kuwa ugu sii muhiimsan

Sidoo kale daraasad ay sameeyeen hawlwadeen Wasaarda Hawlaha Guud Guriyeyta iyo Gaadiidka waxaa lagu ogaaday in khatar wayn ay inagu hayaan alabaabka bidixda ku yaal ee basaska noocyadooda kala duwan haddaba

-Markii aanu aragnaya khasaaraha  Naf iyo Maal ee inagaga baxa sannad walba Shilka ay sababaan basaska albaabka bidixda ku leh.

-Markii aanu la tashanay dhinacyada ay khusayso.

-Markii aanu aragnay baahida loo qabo waxka bedelka iyo Mamnuucida basaska albaabka bidixda ku leh.

Waxaa la go'aamiyey hoos ku qoran

1. Waxa la mamnuucay soo dejinta basaka albaabka ku leh laga bilaabo 3/2/2014-4/52014
2. Waxaa la amrayaa dhamman hantiilayaasha basaska albaabka bidixda ku leh ee dalka jooga in ay ku bedelaan laga bilaabo 3/2/2014 ilaa 4/5/2014.
3. Sidaaa darteed dhinacyada ay khusayso waxa lagu wargelinayaa in ay ku dhaqmaan isla markaasina u hogaansameen muddad kor ku xusan

Alla Mahad Leh

Mud. Cali Cabdi saayaq

Wasiir-ku-xigeenka Wasaarada Hawlaha Guud

Guriyeynta iyo Gaadiidka JSL

# QAYBTA AFRAAD:

# AMARADA & GO'AANADA MAAMUL

**JAMHUURIYADDA [ALILAND**

XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD

OFFICE OF THE ATTORNEY GENERAL

---

XIG/JSL/20/2014. 20/01/2014

Hargeysa.

Ku: Cidda Ay Khuseyso.

Ujeeddo:- Diiwan Gelin Shirkadeed

Xafiiska Xeer Ilaainta Guud ee Qaranka jamhuuriyadda Somaliland oo uu xil saaray Diiwaan Gelinta Shirkadaha;-

Markuu arkay:- Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo awood u Siinaya Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud in ay Diiwaan geliso Shirkadaha.

Markuu arkay: - Xeerka Shirkadda Magaceedu yahay, AWDAL INMAA GROUP COMPANY, oo ay ku cad yihiin Xubnaha Shirkaddu, sida ku cad Qodobka 11aad (2) (a) Somaliland company Law.

Markuu arkay:- In ay saamiga Shirkaddu waafaqsan yihiin Xeerka Shirkadaha Xeer N0.25/2004 (Company Act of Somaliland) saamiyadooduna ay sugan yihiin.

Markuu arkay:- Saxeexa saamilayda Shirkaddu ay saxeexeen sida uu qabo qodobka 11aad xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha .

<u>Wuxuu Diiwaan Geliyey.</u>

Inay Xafiiskan si sharci ah uga Diiwaan gashan Tahay Xawaalada magaceedu yahay AWDAL INMAA GROUP COMPANY (AIG)**, Astaanteeduna tahay:- ( Doon iyo Guri)** shaqadeeduna tahay dhoofinta soo dajinta iyo dhismaha (Import,Export and Construction), xarunteeduna tahay Magaaladda Boorama, laga bilaabo maanta oo ay taarikhdu tahay 20/01/2014.

Allaa Mahad Leh.

(Xadan Axmed Aadan)

<u>Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka J.S.L</u>

XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD

OFFICE OF THE ATTORNEY GENERAL

---

XIG/JSL/22/2013. 26/01/2014

Hargeysa.

KU: Cidda Ay Khuseyso.

Ujeeddo:- Diiwan Gelin Shirkadeed

Xafiiska Xeer Ilaainta Guud ee Qaranka jamhuuriyadda Somaliland oo uu xil saaray Diiwaan Gelinta Shirkadaha;-

Markuu arkay: - Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo awood u Siinaya Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud in ay Diiwaan geliso Shirkadaha.

Markuu arkay: - Xeerka Shirkadda Magaceedu yahay, KAMIL CONSTRUCTION COMPANY, oo ay ku cad yihiin Xubnaha Shirkaddu, sida ku cad Qodobka 11aad (2) (a) Somaliland company Law.

Markuu arkay: - In ay saamiga Shirkaddu waafaqsan yihiin Xeerka Shirkadaha Xeer N0.25/2004 (Company Act of Somaliland) saamiyadooduna ay sugan yihiin.

Markuu arkay: - Saxeexa saamilayda Shirkaddu ay saxeexeen sida uu qabo qodobka 11aad xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha .

Wuxuu Diiwaan Geliyey.

Inay Xafiiskan si sharci ah uga Diiwaan gashan Tahay Shirkadda magaceedu yahay KAMIL CONSTRUCTION COMPANY, **Astaanteeduna tahay:-(Guri Weyn oo Deyr leh)** shaqadeeduna tahay Dhismaha, xarunteeduna tahay Magaalada Hargeysa, laga bilaabo maanta oo ay taarikhdu tahay 26/01/2014.

Allaa Mahad Leh.

(Xasan Axmed Aadan)

Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka J.S.L

**JAMHUURIYADDA ALILAND**

XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD

OFFICE OF THE ATTORNEY GENERAL

---

XIG/JSL/23/2013. 26/01/2014

Hargeysa.

KU: Cidda Ay Khuseyso.

Ujeeddo:- Diiwan Gelin Shirkadeed

Xafiiska Xeer Ilaainta Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland oo uu xil saaray Diiwaan Gelinta Shirkadaha.

Markuu arkay:- Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo Awood u siinaya Xafiiska Ilaalinta Guud in ay Diiwaan geliso Shirkadaha..

Markuu arkay: - Xeerka Shirkadda Magaceedu yahay, DHIS-KAAL GENERAL TRADING COMPANY, oo ay ku cad yihiin xubnaha Shirkaddu, sida ku cad Qodobka 11aad(2) (a) Somaliland Comany law..

Markuu arkay: - Saxeexa saamilayda Shirkaddu ay saxeexeen sida uu qabo qodobka 11aad Xubintiisa 3aad Xeer Shirkadaha.

Wuxuu Diiwaan Geliyey.

Inay Xafiiskan si sharci ah uga Diiwaan gashan Tahay Shirkaddan ku magacaaban DHIS-KAAL GENERAL TRADING COMPANY, **Astaanteeduna tahay:- (Shimbirka Baaska oo duulaya kuna hoos qoran yahay Magaca Shirkadu)** shaqadeeduna tahay soo Dejinta Alaabooyinka (Export), xarunteeduna tahay Magaalada Hargaysa, laga bilaabo maanta oo ay taarikhdu tahay 26/01/2014.

Allaa Mahad Leh.

(Xasan Axmed Aadan)

**JAMHUURIYADDA ALILAND**

XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD

OFFICE OF THE ATTORNEY GENERAL

XIG/JSL/24/2014. 25/01/2014

Hargeysa.

KU: Cidda Ay Khuseyso.

Ujeeddo:- Diiwan Gelin Shirkadeed

Xafiiska Xeer Ilaainta Guud ee Jamhuuriyadda Somaliland oo uu xil saaray diiwaan gelinta shirkadaha dalka (Firms).

Markuu arkay:- Qodobadda 502aad ee Xeerka Madaniga.

Markuu arkay: - Xeerka Shirkadda ku Magacaaban STRATEGIC TRADINING & LOGISTICS CONSULTANTS SOMALILAND LTD.

Markuu arkay:- Saxeexa saamilayda Shirkaddu ay saxeexeen.

Wuxuu Diiwaan Geliyey.

Inay Xafiiskan si sharci ah uga diiwaan gashan tahay Shirkadda ku magacaban STRATEGIC

TRADING & LOGISTICS CONSULTANTS SOMALILAND LTD, shaqadeeduna tahay (Trading, Logistics, procurement, consultancy), xarunteeduna tahay Magaalada Hargaysa, laga bilaabo maanta oo ay taarikhdu tahay 25/01/2014

Allaa Mahad Leh.

(Xasan Axmed Aadan)

Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka J.S.L

**JAMHUURIYADDA ALILAND**

XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD

OFFICE OF THE ATTORNEY GENERAL

---

XIG/JSL/25/2014. 02/02/2014

Hargeysa.

KU: Cidda Ay Khuseyso.

Ujeeddo:- Diiwan Gelin Shirkadeed

Xafiiska Xeer Ilaainta Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland oo uu xil saaray Diiwaan Gelinta Shirkadaha.

Markuu arkay:- Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo awood u Siinaya Xafiiska Xeer Ilaalinta

Guud in ay Diiwaan geliso Shirkadaha.

Markuu arkay: - Xeerka Shirkadda Magaceedu yahay, O-MART MINERAL COMPANY, oo ay ku cad yihiin Xubnaha Shirkaddu, sida ku cad Qodobka 11aad (2) (a) Somaliland company Law.

Markuu arkay:- In ay saamiga Shirkaddu waafaqsan yihiin Xeerka Shirkadaha Xeer N0.25/2004 (Company Act of Somaliland) saamiyadooduna ay sugan yihiin.

Markuu arkay:- Saxeexa saamilayda Shirkaddu ay saxeexeen sida uu qabo qodobka 11aad xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha .

Wuxuu Diiwaan Geliyey.

Inay Xafiiskan si sharci ah uga Diiwaan gashan Tahay Shirkadda ku magacaaban yahay O-MART MINERAL COMPANY (OMCO), **Astaanteeduna tahay:- (Sadex burood oo doog ku dhex jira cadceeduna ka dembeyso)** shaqadeedu tahay Ganacsiga Macdanta (mining Export), xarunteeduna tahay Magaalada Hargaysa, laga bilaabo maanta oo ay taarikhdu tahay 02/02/2014.

Allaa Mahad Leh.

**(Xasan Axmed Aadan)**

**JAMHUURIYADDA ALILAND**

XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD

OFFICE OF THE ATTORNEY GENERAL

---

XIG/JSL/26/2014. 02/02/2014

Hargeysa.

KU: Cidda Ay Khuseyso.

Ujeeddo:- Diiwan Gelin Shirkadeed

Xafiiska Xeer Ilaainta Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland oo uu xil saaray Diiwaan Gelinta Shirkadaha;-

**Markuu arkay:-** Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo awood u Siinaya Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud in ay Diiwaan geliso Shirkadaha.

**Markuu arkay: -** Xeerka Shirkadda Magaceedu yahay, HEEGO CONSTRUCTION AND TRANSPORTATION COMPANY, oo ay ku cad yihiin Xubnaha Shirkaddu, sida ku cad Qodobka 11aad (2) (a) Somaliland company Law.

**Markuu arkay:-** In ay saamiga Shirkaddu waafaqsan yihiin Xeerka Shirkadaha Xeer N0.25/2004 (Company Act of Somaliland) saamiyadooduna ay sugan yihiin.

Markuu arkay:- Saxeexa saamilayda Shirkaddu ay saxeexeen sida uu qabo qodobka 11aad xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha .

Wuxuu Diiwaan Geliyey.

Inay Xafiiskan si sharci ah uga Diiwaan gashan Tahay Shirkadda ku magacaaban yahay HEEGO CONSTRUCTION AND TRANSPORTATION COMPANY, **Astaanteeduna tahay:- (Guri Mutul ah oo ay ku hoos qoran tahay Magaca shirkada oo la soo gaabiyey)** shaqadeeduna tahay dhismaha (Construction), xarunteeduna tahay Magaalada Hargeysa, laga bilaabo maanta oo ay taarikhdu tahay 02/02/2014.

Allaa Mahad Leh.

(Xasan Axmed Aadan)

**Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka J.S.L**

**JAMHUURIYADDA ALILAND**

XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD

XIG/JSL/162/2013. 16/02/2014

Hargeysa.

KU: Cidda Ay Khuseyso.

Ujeeddo:- Magac Bedel Shirkadeed.

Markuu arkay:- Warqada Codsiga ah ee ay Soo Qorteen Mulkiilahayaasha Shirkada ee Ku Taariikhaysan 14/02/2014.

Markuu arkay: - Warqadda Wasaaradda Ganacsiga ee sumadeedu tahay WGM/AG/375/2014, ee 10/02/2014 oo ay ku ogolaatay magic bedelka Shirkadda GOLIS SOLAR COMAPNY .

Markuu arkay:- Heshiiska Nootaayadda ee Sumadiisu tahay TPN/H/1077/2014 ee 12/01/2014.

Markuu arkay:- Qodobka 22aad ee Somaliland Company Law.

WuxuuCaddeynayaa.

In Shirkadda Magaceedu yahay GOLIS SOLAR COMPANY, kuna diwaan Gashan Lamberka

XIG/JSL/162/2012, loo Bedelay Magaca **GOLIS ENERGY,** oo xaruntiisu tahay Magaaladda Hargeysa.

Allaa Mahad Leh.

(Xasan Axmed Aadan)

**Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka J.S.L**

**MAXKAMADDA SARE**

**MS/48/013** **18/01/014**

Ku: Garyaqaanka Guud Ee Dawlada ee faafinta rasmiga ah

Ku: Taliayaha Saldhiga Booliska ee Ib/koodbuur

Ku: Idaacada Raadiyaw Hargeysa

Ku: Jaraa'idka Madaxa Banaan

Ku: Degmadda Ib/koodbuur

Og: Taliyaha Qaybta Galbeedka Hargeysa

Og: Dahxal tooyada Marxuum Maxamed Ciiltire

Og: C/Casiis Cali Nuur

**Ujeedo: Amar Xayiraad dhul cabirkiisu yahay 40x100**

**Jihooyinkiisuna afarta jahoba waxaa ka xiga Wado**

Markay Aragtay :- Galdacwadeedka sumadiisu sare ku xuan tahay kana dhexeeya dhinacyada sare ku xusan.

Markay Aragtay:- Arjiga codsiga xayiraada eek u taariikhaysan 15/01/2014, ee uu maxkamadda u soo qortay qareenka Rafcaanlayaasha Barkhad Jaamac Aar kuna codsaday in loo xayiro dhulka dacwadiisu Maxkamadda sare taalo, kuna sheegay in dhinacii rafcaansaneyaashu ay dhisayaan halkii dacwadu ka socotay.

Markay Aragtay:- Qodobka2 293-294 XHM, waxuu soo saaray xayiraadan soo socota,

1. Waxaa la xayiray dhulka cabirkiisu iyo jihooyinkiisu ujeedada sare ku xusan yahay, in aan la dhisi Karin. La rahmi Karin, sifa kalena loo istic maali Karin ilaa inta amar danbe maxkamadda sare ka soo baxayo.
2. Waxaa la farayaa Taliyaha Booliska IB/koodbuur in uu ku soo eedeeyo danbiga ku xusan amar diido Qod 308 XCG.
3. Waxaa la soo saaray manta 18/01/2014

**Yuusuf Ismaaciil Cali**

**Gudoomiyaha Maxkamadda Sare Ee J.S.L**

**JAMHUURIYADA SOMALILAND**

**MAXKAMADDA SARE**

---

**MS/1/02/2014** **25/01/2014**

Ku: Garyaqaanka Guud Ee Dawlada ee faafinta rasmiga ah

Ku: Taliyaha Saldhiga Boooliska ee Maxamed Mooge

Ku: Idaacada Raadiyaw Hargeysa

Ku: Jaraa'idka Madaxa Banaan

Ku: Degmada Maxamuud Haybe

Og: Taliyaha Qaybta Bariga Hargeysa

**<u>Ujeedo:-Amar Xayiraad dhul cabirkiisu yahay 18x12 Koonfur Waddo/ Galbeed wado,Bari dhisme/Waqooyi dhisme</u>**

Markay Argtay :-Arjiga codsiga xayiraada ee ku taarikhaysan 18/01/2014, ee uu maxkamadda u soo qortay Rafcaanle Ismaaciil Faarax Maxmed kuna taariikhaysan 18/01/2014 kuna codsaday in loo xayiro dhulka dacwadiisu Maxkamadda sare taalo, kuna sheegay in dhinacii rafcaansanuhu uu dhisayaan halkii dacwadu ka socotay.

Markay Aragtay:- Qodobka2 293-294 XHM, waxuu soo saaray xayiraadan soo socota,

1. Waxaa la xayiray dhulka cabirkiisu iyo jihooyinkiisu ujeedada sare ku xusan yahay, in aan la dhisi Karin. La rahmi Karin, sifa kalena loo istic maali Karin ilaa inta amar danbe maxkamadda sare ka soo baxayo.
2. Waxaa la farayaa Taliyaha saldhiga Booliska Maxamed Mooge in uu ku soo eedeeyo danbiga ku xusan amar diido Qod 308 XCG.
3. Waxaa la soo saaray manta 18/01/2014

**Yuusuf Ismaaciil Cali**

**Gudoomiyaha M[illegible]are Ee J.S.L**

**JAMHUURIYADA SOMALILAND**

# MAXKAMADDA SARE

**MS/1/03/2014** **13/02/2014**

Ku: Garyaqaanka Guud Ee Dawlada ee faafinta rasmiga ah

Ku: Taliyaha Saldhiga Booolisлka Axmed Dhagax

Ku: Idaacada Raadiyaw Hargeysa

Ku: Jaraa'idka Madaxa Banaan

Ku: Degmada Axmed Dhagax

Og: Taliyaha Qaybta Galbeed

**Ujeedo:-Amar Xayiraad dhul cabirkiisu yahay 60x24 jihooyinkiisuna ka la yihiin Waqooyi/Galbeed/Koonfur/Waddo,Bari/dhisme**

Markay Argtay :-Arjiga codsiga xayiraada ee ku taarikhaysan 06/02/2014, ee uu maxkamadda u soo qortay Rafcaanle Shugri Axmed Jaamac kuna codsaday in loo xayiro dhulka dacwadiisu Maxkamadda sare taalo, kuna sheegay in dhinacii rafcaansanyaashu ay dhisayaan dhulkii dacwadu ka socotay.

Markay Aragtay:- Qodobka2 293-294 XHM, waxuu soo saaray xayiraadan soo socota,

1. Waxaa la xayiray dhulka cabirkiisu iyo jihooyinkiisu ujeedada sare ku xusan yahay, in aan la dhisi Karin. La rahmi Karin, sifa kalena loo istic maali Karin ilaa inta amar danbe maxkamadda sare ka soo baxayo.
2. Waxaa la farayaa Taliyaha Booliska Axmed Dhagax qaybta masalaha in uu ku soo eedeeyo

danbiga ku xusan amar diido cida jabisa amarka Maxkamadda sare Qod 308 XCG.

3. Waxaa la soo saaray manta 18/01/2014

**Yuusuf Ismaaciil Cali**

**Gudoomiyaha Maxkamadda Sare Ee J.S.L**

**JAMHUURIYADA SOMALILAND**

**MAXKAMADDA SARE**

---

**MS/DC/1/2014** **22/02/2014**

Ku: Garyaqaanka Guud Ee Dawlada ee Faafinta Rasmiga ah

Ku: Taliyaha Saldhiga Dhexe ee Magaaladda Berbera

Og: Taliyaha Qaybta Booliska Gobolka Saaxil Berbera

Ku: Idaacada Raadiyaw Hargeysa

Ku:Jaraa'idka Madaxa Banaan

Ku: Duqa Berber

**Ujeedo:- Amar Xayiraad Dhul cabirkiisu yahay 57,5x88 mit, jihooyinkiisuna kala yihiin, Barri, Waddo,Galbeedka,Waddo.Koonfur,dhisme,Waqooyi,dhisme,dhulkaas oo leh Balookyo lanber oo kala ah 1-plot No,W/51,iyo Plot,No,W/55**

Markay Aragtay:- Arjiga codsiga xayiraada eek u taariikhaysan 17/02/2014, ee uu Maxkamadda Sare u

soo qortay Aadan Cali Caraale, kuna codsaday in loo xayiro dhulka dacwadiisu Maxkamadda Sare taalo, kuna sheegay in dhinacii Rafcaansanuhu uu dhisayaan halkii dacwadu ka socotay.

Markay Aragtay:- Qodobka2 293-294 XHM, WAXUU SOO SAARAY XAYIRAADAN SOO SOCOTA,

1. Waxaa la xayiray dhulka acabirkiisu iyo jihooyinkiisu ujeedada sare ku xusan yahay, in aan la dhisi Karin. La rahmi Karin, sifa kalena loo isticmaali Karin ilaa inta amar danbe Maxkamadda Sare ka soo baxayo.
2. Wxaa loo xilsaaray Taliayaha Saldhiga Booliska Dhexe Ee Berbera in uu kor joogteeyo amarka xayiraada cidii jabisana uu ku soo Eedeeyo danbiga ku cad amar diido ee ku xusan, Qod 308 XCG.
   Waxaa la soo saaray Maanta 22/02/2014

(YUUSUF ISMAACIIL CALI)

GUDOOMIYAHA MAXKAMADDA SARE EE J.S.L